

Maclumaadka ku saabsan mashruuca cilmi baarista



Salaan sare,

Magacaygu waa Mona Tynkinen, waxaan ahay ardayad jaamacadeed, taas oo macnaheedu tahay inaan wado mashruuc daraasadayn ah oo ku saabsan macallimiinta ardayda ah ee akhrista barnaamijka macalliniimada gaar ahaan farsamo cusub, kuwaasoo ah shaqaale iyo ardayba isku ah. Daraasadan cilmi baarista ee aan wado, waxaan ku eegayaa waxa macallimiinta ardayda ah ay qabtaan maalmaha ay ku shaqaynayaan macalliniimada. Maamulaha dugsigaaga ayaa oggolaaday inaan iman karo dugsigiina xilliga deyrta, inta lagu jiro maalmaha shaqo, si aan u raaco macallimiinta ardayda ah, maalin ama dhawr maalmood.

Waa maxay sababta cilmi baarista loogu baahan yahay?

Iswidhan, macallimiin badan oo cusub ayaa loo baahan yahay. In la tababaro macallimiin cusub waxay qaadataa sannado badan, isla markaana macallimiin badan ayaa looga baahan yahay dugsiga iyo fasalka dhexdiisa. Sidaa darteed kulliyadaha iyo degmooyinka qaarkood ayaa bilaabay qaab cusub in macalinka uu shaqayn karayo isagoo ah arday. Maaddaama ay tahay nooc cusub oo waxbarasho ah, waxaa lagama maarmaan ah in la ogaado waxa ay ka dhigan tahay in la noqdo macallin marka aad ka qaybqaadaneysa tababarka macallimiinta noocaas ah.

Sida cilmi baaristu u socoto?

Waxaan ku sugnaan doonaa dugsigiina oo aan ku daba jiri doonaa macallin arday ah maalin am dhowr maalmood oo aan la socon doono meel kasta, oo aan ku baran doono waxa ay / ay ka qabato shaqadeeda, inta lagu guda jiro maalinta shaqada (Uma dan lihi ardayda ama shaqaalahaa dugsiga). Waxaa aan u arko sida sidoo kale waan qoran doona sia warqad xusuus-qor ah.

Waxaa jira xeerar cilmi baaris oo aan oofiyay in aan raaco. Tusaale ahaan, in qof walba oo dugsiga jooga uu helo maclumaadkan si aad u ogaataan qofkaa aan ahay, iyo waxa aan sameeyo iyo sababta aan u samaynayo.

Xor ayaad u tahay inaad ila soo xiriirto haddii aad wax su'aalo ah qabtid ama aad rabto inaad waxbadan ka ogaato waxa aan sameeyo! Maclumaadka la xiriirka aniga iyo kormeerahayga ugu weyn waxaa laga heli karaa xagga hoose.

Salaan ka timid

//Mona Tynkinen



Mona Tynkinen, doktorand i
Pedagogik med inrikning mot
Arbetsintegrerat lärande (AIL) vid
Högskolan Väst
mona.tynkinen@hv.se mobil: [REDACTED]
[REDACTED]



Helena Korp, huvudhandledare,
docent i pedagogik vid Högskolan Väst
helena.korp@hv.se tel: [REDACTED]